

Somali (Somali)
Su'aalaha Badanaa
Nalawaydiiyo
Lataliyaasha
ARTS @ King Street
Station

Seattle Office of Arts & Culture wuxuu hadda qabanayaa codsiyada lataliyaasha ARTS @ King Street Station

Seattle Office of Arts & Culture (ARTS, Xafiiska Farshaxanka iyo Dhaqanka ee Seattle), oo kaashanaaya Seattle Department of Transportation (Waaxda Gaadiidka ee Seattle), ayaa furaaya xarun dhaqanka loogu talagalay - oo looyaqaano ARTS @ King Street Station - taasoo kutaala dabaqa sadexaad ee xarunta King Street Station marka lagaaro bisha Janaayo 2019.

ARTS waxay hadda qabanaysaa codsiyada lataliyaasha ARTS @ King Street Station. Kani waa koox cusub oo dhawan lasameeyay kana kooban hogaamiyaal iyo shaqsiyaad farshaxanka/dhaqanka daneeya kuwaasoo kala shaqayn doona shaqaalaha ARTS si looqaajiyo in barnaamijyada xarunta [ARTS @ King Street Station](#) ay dhiirigaliyaan sinaanta qoomiyadaha, ay matasho ayna soodhawayso bulshooyinka kaladuwan, ayna soobandhigto xirfado badan oo hal abuur leh.

Lataliyaashu waxay kashaqayn doonaa xarunta **mudo labo sano ah kana bilaabanaysa bisha Nufeembar 2018 iyo dhamaadka bisha Oktoobar 2020.**

Lataliyaashu waxay kukulmayaan **Arbocooyinka 2aad ee bilkasta King Street Station laga bilaabo saacada 3:30 – 5:30 p.m.**

Kulanka koobaad wuxuu noqonayaa **mid nus maalin ah oo isbarasho ah lana qabanaayo Arbacada, Nufeembar 14, laga bilaabo 3pm-7:30pm.**

Lataliyaashu waxay dib u eegis kusamaynayaan codsiyada lasoo dirsado inta udhaxaysa kulamada (kudhawaad 2-4 saacadood bishiiba).

Dadka jira da'da 15+ waxaa lagu dhiiri galinayaa inay codsadaan.

Laxariir: S Kuwa kore, Hogaanka Barnaamijka King Street Station

Emailkaa: s.surface@seattle.gov | Taleefanka: (206) 256-5484

Wixii kusaabsan Seattle Office of Arts & Culture | [Macluumaadka dhismaha King Street Station](#)

Codso

Fadlan buuxi oo dir codsiga marka lagaaro **Wednesday, Sibteembar 26 saacaduna tahay 5pm PST.**

Waraysiyada codsiga waxaa laqabanayaa bisha Oktoobar 2, 3, iyo 4, inta udhaxaysa saacadaha 9:00am - 6:00pm.

Si codsiga looga dhigo mid si fudud lagu heli karo, waxaan lenahay labo qaab oo wax lagu codsan karo. **Fadlan mid kadooro:**

DOOKHA 1 - QORAAL AHAAN - Buuxi codsiga [Qoraal](#) ka ha - Surveymonkey
(Jawaabo gaaban, Dookhyo Badan, iyo su'aalo fudud oo ilaa 250 eray ah midiiba.)
[Kasoo dagso foomka codsiga oo word .docx ah oo qoran halkaan.](#) (Somali)

DOOKHA 2- MUUQAAL - kusoodir [Codsi Muuqaal ah](#) - Surveymonkey
(Muqaal ilaa 4 daqiiqo soconaaya guud ahaan; lifaaqa soogali YouTube.)
[Kasoo dagso foomka codsiga oo word .docx ah oo muuqaal ah halkaan.](#) (Somali)

Su'aalaha Badanaa Nalawaydiiyo - CODSIGA

TAARIIXHAHA MUHIIMKA AH

- **XILIGA KAMA DANBAYSTA U AH CODSIYADA:** Arbacada, Sibteembar 26, 5 p.m.
- **WARAYSIYADA:** Oktoobar 2, 3, 4
- **Ogaysiiiska:** Ugu danbayn Oktoobar 19
- **BILOWGA/ISBARASHADA:** Arbacada, Nufeembar 14

Waayo Lataliyaasha ARTS @ King Street Station?

Lataliyaasha xarunta ARTS @ King Street Station waa koox dhawaan la abuuray oo katirsan hogaamiyaasha bulshada iyo khubaro dhanka farshaxanka/dhaqanka ah kuwaasoo naga caawin doona in xarumaha barnaamijyadeenu noqdaan kuwo dhiirigaliyaan sinaanta qoomiyadaha, ay matasho ayna soodhawayso bulshooyinka kaladuwan, ayna soobandhigto xirfado badan oo hal abuur leh. Dadka jira da'da 15+ waxaa lagu dhiiri galinayaa inay codsadaan.

Maxay kooxdaani qabtaan?

Waxay **TALOSIIYAAN** Seattle Office of Arts & Culture (ARTS) ayagoo xubin ka ah gudi dib u eegis kusameeya codsiyada kayimaada bulshaynta dhaqanka, waxayna soojeediyaan barnaamijyada laxariira hogaanka waaxda.

Waxay bulshadooda **LAWADAAGAAN** shaqooyinka xarunta ARTS @ King Street Station. Sidoo kalana waxay lawadaagaan fikradaha, waxyaabaha ay xiiseeyaan, iyo walaacyada bulshadooda xarunta ARTS.

Waxay **KUCASUUMAAN** bulshooyinka dhaqanka iyo farshaxanku inay soocodsadaan barnaamijyo, munaasabado iyo bandhigyo.

Waxay **ILAALIYAAN** [shaqada](#), [higsiga](#), [iyo dadaalka sinaanta isirada ee](#) ARTS @ King Street Station

Waxay **ISKUXIRAAN** xaafadaha goobta udhawdhaw, iyo bulshooyinka dhaqanka ee Seattle oo dhan.

Yaa noqon kara lataliye?

- **Lataliyaashu waa inay jiraan 15 sano** kulanka koobaad ee laqabanaayo Nufeembar 14, 2018. Waa inay saxiixaan ogolaanshaha waalidka/masuulka ee laga doonaayo.
- Waxaan kudadaalaynaa inaan dhisno koox qoomiyado kaladuwan kasoo jeeda oo lataliyaal ah, kuwaasoo leh khibrad balaaran, jinsiyado, xaalado nololeed, da'o, iyo dhaqano intuba kaladuwan. **Majiraan shuruudo ugaar ah waxbarashada ama shaqada qofka.**

Waa maxay caawimaadaha laheli karo?

- Baahiyaha helitaanka ee lataliyaasha waa ladaboolayaa. (Tusaale: Turjumaada luuqad caalami ah, fasiraada ASL, iwm.) Waxaan wax kudiyaarinaynaa hadba sidii loosoo codsado. Fadlan laxariir s.surface@seattle.gov / (206) 256-5484.
- Lataliyaasha waxaa markasta ufuran inay keenaan caruurtooda kulanada, inkastoo aan adeeg gaar u ah daryeelka caruurta loosamayn doonin.

Waa meeqa mushaarku?

Lataliyaashu waxay helayaan \$400 lacag dhan oo sanadkii lasiinaayo si ay ugu baxshaan qarashaadka gaadiidka/baakinka markay kulanada imaanayaan.

Waqti intee le'eg ayay kubixinayaan? Waa maxay waajibaadka saaran lataliyaasha?

- Inay muddo labo sano ah xarunta u adeegaan, waxayna ushaqayn karaa labo jeer (iskuxigta ama aan iskuxigin).
- Inay sooxaadiiraan kunalada bilaha ah ee xarunta King Street Station, **Arbacada 2aad ee bilkasta, 3:30pm - 5:30pm**, iyo nus maalin kamid ah kulanada isbarashada ah ee sanadkii oo dhan laqabto (kuwaasoo badalaaya kulanada joogtada ah.)
- Kulanka koobaad wuxuu noqonayaa kulan isbarasho oo **nus maalin ah lana qabanaayo Arbacada, Nufeembar 14, 3:00pm - 7:30pm**.
- Inay codsiyada dib u eegis kusameeyaan inta udhaxaysa kulanada.
- Inay sidhaqso ah uga jawaabaan xariirada ubaahan inay kajawaabaan.

Waqtiga kulanka bilaha ah waxaa lagu jaangooyay jadwalka dugsiyada Seattle Public Schools (Dugsiyada Dadwaynaha ee Seattle), kaasoo leh fasaxa galinka hore lasiiyo ardayda dugsiyada sare maalmaha Arbacada ah una fasaxaaya dhalinta inay isdiyaariyaan, ayadoo sidoo kale kubeegan maalinta dhamaadka shaqada ee dad badan.

Yaa codsan kara?

Waxaan ubaahanahay koox lataliyaal ah kuwaasoo matali kara bulshooyinka faraha badan ee aan u adeegno. Dadka qaar ayaa yeelan kara astaamo badan oo kujira liiska soosocda. Tan waxa loogu talagalay inay biloow noqoto, ayna kujiraan laakiin aan kukoobnayn:

- Farshaxaniistayaasha, Hab abuurada, Dadka wax sawira, Dadka wax sameeya, Farshaxanada, qoraayaasha, majaajilaystayaasha. Xirfadlayaasha ama kuwaan xirfada lahayn, oo bartay cilmiga ama maadada hab dhaqanka. Sookoraaya, xirfad kujira, aasaasan, iyo kuwa bulshada ushaqeeya dhamaan waa lasoo dhawaynayaa.
- Bulshooyinka midab takoorka lala beegsado
- Dadka da'aha kaladuwan, ayna kujiraan dhalinta iyo daqoowdu
- Noocyada kaladuwan ee dadka jinsiga iyo galmada
- Sogalootiga, qaxootiyaasha, Muwaadiniinta Maraykanka, iyo bulshooyinka kale ee jaaliyadaha ah
- Dadka naafada ah
- Dadka kunool ama udhaw nolosha faqriga ah
- Dadka aan guri fiican haysan ama hoygaba haysan
- Dadka uu saamaynta kureebay xabsiga ama danbi dusha laga saaray
- Dadka kunool, kashaqeeya, ama adeegyada kuhela aaga Chinatown-International District iyo Pioneer Square
- Shaqaalaha Farshaxanka iyo Dhaqanka: maamulayaasha, macalimiinta, ilaaliyaahsa madxafyada, diyaariyaasha, diiwaangaliyaasha, qoraayaasha farshaxanka, dadka iibsada hal abuurka, madxaflayaasha, adeegyada martida, waardiyaasha, ilaaliyaasha, agaasimayaasha, aruuriyaasha, iyo kuwo kale oo badan
- Xubnaha bulshada ee kashaqeeya banaanka "fanka farshaxanka": shaqaalaha farsamada, dadka dhariyada sameeya, naqshadiistayaasha, waalidiinta shaqadooda buuxdo ilmaha tahay, dhakhaatiirta, shaqaalaha dhismaha, qandaraasleyaasha, muhandisiinta, injineerada, qareenada, iyo kuwo kale oo badan Fursadaan waxay ufurantahay qofkasta oo diihaal uhaya farshaxanka iyo kobcinta bulshada, ayadoon laga fiirinayn xirfadiisa.
- Seattle Arts Commissioners (Gudoomiyaasha Farshaxanka Seattle)

Yaa dooranaaya Lataliyaasha?

- Kooxda ugu horaysa lataliyaasha waxaa lagu xulunayaa nidaam codsasho ah. Shaqaalaha Office of Arts & Culture ayaa dib u eegis kusamaynaaya codsiyada.
- Mustaqbalka danbe, xubnuhu waxay kusoo biiri karaan xarunta ayagoo soomaraaya codsiyada furan, magacaabid ay soo magacaabaan xubnaha lataliyaasha ah ee horay usii jiray, iyo/ama magacaabid yada Magaaladu samayso. Kooxda ugu horaysa ee lataliyaasha ladoorto ayaa gacan kagaysanaaya qaabaynta nidaamka doorashada xubnaha.

Waa nooc ee codsiyada ay Lataliyaashu dib u eegista kusamaynaayan?

- Waxaan xiisaynaynaa inaad dad waynaha kafaaiidaysano sida xarunta loo isticmaali karo, kaliya maaha inaan raacno sidii horay loogu isticmaali jiray.
- Waxaan filaynaa inay nasoo garaan codsiyada bandhigyada, riwaayadaha, qoob kaciyaarka, muusiga, khudbadaha, muuqaalada, kulanada cunta kariska, akhriyada maktabada, hadal jeedinta, qaababkaan oo dhan oo laysku dhafay, iyo kuwo kale oo badan. Waxaan dhisaynaa codsiyo biloow iyo dhamaad leh, anagoo bulshada kucasuumayna inay nala wadaagaan fikrado laxariira xarunta noocadu cusub yahay. Waxaa nalaga doonayaa inaan fahano qaabka bulshooyinku doonayaan in loo adeegsado xarunta ARTS @ King Street Station.
- Lataliyaashu waxay sidoo kale dib u eegista kusamaynaayan codsiyada fursadaha laqondeeyay, ayna kujiraan: Barnaamijka Artist-In-Residence (Farshaxanka xaafada), Art & Architecture (Farshaxanka iyo Naqshada Dhismaha), iyo doorashada codsadayaaasha si loo abuurro xog aruurinta wareegta ee Gobalka (2019, 2020) iyo Bandhigyada Sadexdii sanabada mar laqabto ee Caalamiga ah (2021).
- Kahor intaan dib udayactirka lagu samayn, farshaxaniistayaal badan, aruuriyaal, iyo dadka cuntooyinka kariya ayaa goobta kusoo bandhigay bandhigyo, masraxyo, iyo munaasabado:
 - [King \(Tut\) Street Station](#), Pacific Science Center (Xarunta Sayniska), 2012
 - [Ka qarsoomida isha 2015](#), soosaarista 5 ee aasaasiga ah, Agoosto 2015
 - [Talaabooyinka Miisanka leh](#), soosaarista 5 ee aasaasiga ah, Maarso 2016
 - [Ku-meelgaarka](#), Farshaxanka Iskudhafka ah, May 2016
 - [TUF LUV](#), Barnaamijyada Iskudhafka ah ee TUF, Juun 2016
 - [Ka qarsoomida isha 2016](#), soosaarista 5 ee aasaasiga ah, Agoosto 2016
 - [9e2](#), Oktoobar 2016
 - [The Bureau of Arts & Culture \(Laanta Farshaxanka iyo Dhaqanka\)](#), Vsoosaarista 5 ee aasaasiga ah, Deseembar 2016
 - [Truth B Told](#), Fanka Farshaxanka ONYX, Janaayo-Feebaraayo 2017
 - [Xadka + sii jiray](#), Office of Arts & Culture ee Seattle Agoosto-Oktoobar 2017

Lataliyaashu macodsan karaa barnaamijyada lagu qabto xarunta ARTS @ King Street Station?

- Haa. ARTS @ King Street Station waxay udhisan tahay inay abuurto fursado ayna bixiso goobo ay bulshooyinka ay wax kusoo bandhigtaan bulshooyinka aan cadaanka ahayn iyo kuwa taariikh ahaan xaqooda aan lasiin jirin. Waxaan doonaynaa in bulshooyinkaas kaqaybgalaan barnaamijka ayagoo Lataliyaal ah - sidoo kalana madoonayno in qofka oo xubin kanoqdo lataliyaasha ay kaqabad kunoqoto kaqaybgalka shaqsiga ama bulshadiisa inuu wax kusoo bandhigto xarunta ARTS @ King Street Station.
- Lataliyaashu waa inay cadeeyaan waxyaabaha iskudhaca dhanka masaalixda ah keenaaya. Qofna maqiimayn karo shaqadiisa shaqsiga ah, walaa tan qof qaraabadiisa ah, qof ganacsi kalashaqeeeya, saaxiib ay iskudhawyihiin, qof ay qol isla daganyihiin, iwm.

Waa maxay macluumaadka aasaasiga ah ee ARTS @ King Street Station? Waa sidee goobtu?

[Faahfaahin badan](#) oo kusaabsan dhismaha iyo nidaamka qorshaynta halkaan kafiiri.